جمهورية مصر العربية　　　4 جمادى الآخرة 1443هـ
وزارة الأوقاف　　　7 يــنــايـــر 2022م

(1)

# Shaqada waa sharaf

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{وَقُلِ اعْمَلُوا فَسَيَرَى اللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ وَسَتُرَدُّونَ إِلَى عَالِمِ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ}،**

**(Dheh: camalfala wuu arki doonaa Alle camalkiina iyo rasuulkiisa iyo mu'miniinta, waxaana la idin celinayaa midka og waxa maqan iyo waxa jooga wuxuuna idin sheegayaa waxaad samayn jirteen)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Islaamka wuxuu u eegay shaqada eegmo weyneyn iyo sharaf wadato, waa waddada sarreynta iyo hormarka, qofka fiirfiirinaya quraanka kariimka wuxuu ka arkayaa inuu si cad ugu yeerayo shaqada koonka lagu camirayo, adduunyada oo dhan aad ku heli karto, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{هُوَ أَنْشَأَكُم مِّنَ الأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا}،**

**(Isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa),** wuxuu leeyahay (SW):

**{هُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ ذَلُولًا فَامْشُوا فِي مَنَاكِبِهَا وَكُلُوا مِنْ رِزْقِهِ وَإِلَيْهِ النُّشُورُ}،**

**(Alle waa kan dhulka ka dhigay mid laylan ee ku socda waddooyinkiisa kana cuna quudkiisa kulankana haggiisa ayuu ahaan)** wuxuu leeyahay (SW):

**{فَإِذَا قُضِيَتِ الصَّلَاةُ فَانْتَشِرُوا فِي الْأَرْضِ وَابْتَغُوا مِنْ فَضْلِ اللَّهِ وَاذْكُرُوا اللَّهَ كَثِيراً لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ}**

**(Markase salaadda la dhammeeyo dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Alle, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaan)**

Muhiimadda camalka uu leeyahay awgeed ayaa salaadda kadib laysu amray, wuxuu ahaa sayidkeena Ciraak bin Maalin (Alle raalli haka noqdee) markuu jumcada tukado wuu gadoomi jiray wuxuu ag istaagi jiray albaabka masjidka wuxuu dhihi jiray: ilaahayow waan ajiibay yeeriddaada waana tukaday waajibkaaga waana soo foofay sidaad i amartay arsaaq iga sii fadligaaga adigaa ah midka ugu khayrka badan kuwa wax arsaaqa.

Sidoo kale sunnada nabawiga dahiran waxaa ka buuxda in laysugu yeero shaqada laguna dadaalo, iyadoo loo arkayo sharaf oo aadanaha karaamada u ilaalinayso, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(أفضلُ الكسْبِ بيعٌ مبرورٌ، وعملُ الرجلِ بيدِه)،**

**(tabbashada waxaa ugu fiicab iibka wanaag la socdo iyo shaqada qofka gacantiisa uu ku qabanayo)**

wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لأن يَحْتَطِبَ أَحَدُكُمْ حُزْمَةً عَلَى ظَهْرِهِ خَيْرٌ لَهُ مِنْ أَنْ يَسْأَلَ أَحَدًا فَيُعْطِيهِ أَوْ يَمْنَعُهُ)،**

**(Midkiina inuu qoryo dhabarka kusoo qaato ayaa ugu khayr badan inuu qof wax weyddiisto ha siiyo ama ha u diido),** Sufyaan althowri (Alle ha u naxariistee) wuxuu soo mari jiray dadka qaar iyagoo fadhiya masjidka xaramka, wuxuu dhahay: maxaa idin fariisiyay? Waxay dhaheen maxaannu sameynaa? Wuxuu yiri: fadliga Ilaahay raadiya ee muslimiinta, kiil haku noqonina, wuxuu leeyahay sayidkeena Cumar (Alle raalli haka noqdee): midkiina yuusan ka fariisanin raadinta arsaaqda oo uu dhahayo: ilaahayow i arsaaq; waxaad ogaateen samada inaysan soo daadinin dahab iyo qalinba.

Sharafta iyo muhiimadda ay shaqada leedahay awgeed ayaa anbiyada (CS) gacmahooda ku shaqaysan jireen, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كَانَ دَاوُدُ (عليه السلام) لا يَأْكُلُ إِلَّا مِنْ عَمَلِ يَدِهِ)،**

**(nabi daawuud – nabadgelyo korkiisa ha ahaatee– wuxuu ka cuni jiray wixii gacantiisa shaqeyso),** wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كَانَ زَكَرِيَّا (عليه السلام) نَجَّارًا)،**

(**nabi Sakariye – nabadgelyo korkiisa ha ahaatee– wuxuu ahaa faryaame**)

Nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) isagaa wax qabsan jiray, wuxuu u adeegi jiray ehelkiisa, waxay leedahay sayida Caa'isha (Alle raalli haka noqdee): wuxuu ahaa rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) qof sameysta kabtiisa maradiisana tola, sidoo kale wuxuu noogu yeeray shaqada ilaa aakhirka cimrigeena, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنْ قَامَتِ السَّاعَةُ وَبِيَدِ أَحَدِكُمْ فَسِيلَةٌ ، فَإِنْ اسْتَطَاعَ أَنْ لاَ يَقُومَ حَتَّى يَغْرِسَهَا فَلْيَفْعَلْ).**

**(Haddii ay qiyaamo dheceyso midkiinana gacantiisa tallaal uu ku jiro hadduu awoodo inaysan qiyaame dhicin ilaa uu ka tallaalayo ha tallaalo)**

Sharafta shaqada waxaa ka mid ah in shareecada islaamka ay ajirka shahiidka u sugtay qof kaste oo shaqaysanaya oo u ordaya cuntada awlaaddiisa, wuxuu isku xiray quraanka kariimka shaqada iyo waddada xaqqa u huritaankeeda, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَآخَرُونَ يَضْرِبُونَ فِي الْأَرْضِ يَبْتَغُونَ مِن فَضْلِ اللَّهِ وَآخَرُونَ يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ}**

**(iyo kuwo safri iyagoo dooni Khayrka Eebe iyo kuwo u dagaallami Jidka Eebe)**, markuu nin soo maray nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) markay ka arkeena asxaabta nabiga (naxariis iyo nabadgalo korkiisa ha ahaatee) awooddiisa iyo firforcoonidiisa wax iyaga ka yaabiyay, waxay dhaheen: rasuulkii allow haddii kan dar Alle uu ahaan lahaa! Wuxuu yiri rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنْ كَانَ يَسْعَى عَلَى وَلَدِهِ صِغَارًا فَهُوَ فِي سَبِيلِ اللهِ، وَإِنْ كَانَ خَرَجَ يَسْعَى عَلَى أَبَوَيْنِ شَيْخَيْنِ كَبِيرَيْنِ فَفِي سَبِيلِ اللهِ، وَإِنْ كَانَ خَرَجَ يَسْعَى عَلَى نَفْسِهِ لِيَعِفَّهَا فَفِي سَبِيلِ اللهِ، وَإِنْ كَانَ خَرَجَ يَسْعَى عَلَى أَهْلِهِ فَفِي سَبِيلِ اللهِ).**

**(Hadduu u ordayo ilmihiisa oo yaryar wuxuu ku taagan yahay jidka Alle, hadduu usoo baxay asoo u ordaya labo waalid oo duq ah oo waayeelo ah wuxuu ku taagan yahay jidka Alle, hadduu usoo baxay asoo naftiisa dhowraya wuxuu ku taagan yahay waddada Alle, hadduu usoo baxay asoo u ordaya ehelkiisa wuxuu ku taagan yahay jidka Alle)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Islaamka nagama dalbanin shaqo kaliya, balse wuxuu nagu boorriyay sugiddeeda annagoo raadinayna raalliga Alle (caza wa jalla), wuxuu u ballanqaaday rabbigeena (caza wa jalla) qofka sugaya camalkiisa ajir weyn wuxuu leeyahay (SW):

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ إِنَّا لَا نُضِيعُ أَجْرَ مَنْ أَحْسَنَ عَمَلًا}**

**(Kuwa rumeeyay (Xaqa) oo camal fiican falay annagu ma hallayno abaalka Ciddii Wanaajisa Camalka),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلا أَنْ يُتْقِنَهُ).**

**(Wuxuu jecel yahay Alle midkiina hadduu camalfalo inuu sugo)**

Amaanada shaqada waa mas'uuliyad dusha ka saaran shaqaale ama masuul kaste, oo rabbigiisa (caza wa jalla) kaga baqaya wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا}**

**(Eebana wuxuu u Yahay Korkiina Ilaaliye),** wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

**{وَمَا تَكُونُ فِي شَأْنٍ وَمَا تَتْلُو مِنْهُ مِنْ قُرْآنٍ وَلا تَعْمَلُونَ مِنْ عَمَلٍ إِلَّا كُنَّا عَلَيْكُمْ شُهُودًا إِذْ تُفِيضُونَ فِيهِ وَمَا يَعْزُبُ عَنْ رَبِّكَ مِنْ مِثْقَالِ ذَرَّةٍ فِي الْأَرْضِ وَلا فِي السَّمَاءِ وَلا أَصْغَرَ مِنْ ذَلِكَ وَلا أَكْبَرَ إِلَّا فِي كِتَابٍ مُبِينٍ}**

**(Wixii Xaala ood ku Sugan tahay wixii quraana ood Akhrin, wixii camala ood falaysaan waan idin la joognaana (ognahay) markaad dhex galaysaan, kagama Qarsoona Eebahaa waxa u yar Dhulka dhexdiisa iyo Samada, wixii ka yar iyo wixii ka wanynna Kitaab cad bay ku sugna yihiin)**

Marka la weyddiiyay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ixsaanka wuxuu yiri:

**(الإِحْسَانُ أَنْ تَعْبُدَ اللَّهَ كَأَنَّكَ تَرَاهُ، فَإِنْ لَمْ تَكُنْ تَرَاهُ فَإِنَّهُ يَرَاكَ).**

**(Ixsaanka waa inaad u caabuddo Alle adigoo arkaya oo kale haddaadan arkaynin isagaa ku arkaya)**

**Ilaahayow waxaan ku weyddiinaynaa inaan khayr samayno nooga ilaali Masar wax kastoo xun iyo dhammaan dalalka caalamka**